


Wax ka Baro Cudurka Jadeecada



Waa maxay jadeecadu?

Jadeecadu waa cudur aad u faafa oo uu sababo fayraska jadeecadu. Jadeecadu waxay ku bilaabataa qandho fara badan, qufac, duuf sankka ka yimaada, iyo indhaha oo gaduuta, biyo leh. Kaddib saddex ilaa shan maalmood, finan ayaa ku bilaabmaya wajiga waxayna ku faafayaan qaybaha kale ee jirka.

Xaaladaha qaarkood, jadeecadu waxay sababi kartaa in qofka isbitaal la dhigo, maskaxda oo bararta, oofwareen, iyo dhimasho. Carruurta kayar da'da 5 sano, kuwa uu difaacooda jirku liito, iyo dadka uurka leh ayaa khatarta ugu badan ugu jira.

Astaamaha Guud

Qandho
Fara badan



Qufac



Duuf Sanka
ka socda



Indho Guduudan
oo Biyo leh



Finan Jirka oo
Dhan Kasoo baxa



Sidee ayay Jadeecadu U faaftaa?

Qofka xanuunsan ayaa jadeecada ku faafin kara qufaca, hindhisada, neefta, ama hadalka. Dadku waxay jadeecada qaadi karaan marka ay neef ahaan u qaataan hawadaan ama haddii ay fayraska ku qaataan gacmaha ayna wajiga ku taabtaan. Jadeecadu waxay hawada ku jiraysaa ilaa laba saacadood, sidaa daradeed dadku waxay xaataa fayraska qaadi karaan marka uu qofka xanuunsan goobta ka tago.

Joog Guriga oo Wac Dhakhtarkaaga

Haddii aad leedahay astaamaha jadeecada, wac xaafiiska dhakhtarkaaga. Wuxuu ku siin doonaa tilmaamo gaar ah oo aad dadka kale xanuunka uga ilaalinayso. Waa muhiim inaadan jadeecada dadka kale ku faafin. Guriga joog haddii aad jadeeco qabto. Marti ha keensan haddii aad leedahay qandho iyo finan.

Ka ilaali Qoyskaaga jadeecada

- Tallaalka jadeecada, qaamoqashiirka, iyo rubella (MMR) ayaa ah difaaca ugu adag ee jadeecada looga hortagi karo.
- Talaalka MMR ayaa kaa ilaalin kara inaad la xanuunsato jadeecada.
- Caruurta waxay talaalka MMR ku qaataan da'da hal sanno iyo afarta sanno.
- Dadku wali waa ay qaadan karaan talaalka MMR xaataa hadii aysan qaadan xiligii caruurnimada.
- Dadka waa in la talaalaa laba todobaad kahor inta aysan u safrin waddamada kale.
- Maraykanka iyo waddamada kaleba wali waxaa ka dilaaca jadeecada.
- Inaad istalaasho waxay ka ilaalinaysaa naftaada, qoyskaaga, iyo bulshadaada inay jiradaan.
- La hadal dhakhtar aad aaminsantahay, kalkaaliso, ama farmashiile haddii aad su'aalo qabto.

